

### **Waa maxay Hackney LINK?**

Dalladda ka Qaybgilinta Dadweynha Hackney (Hackney Local Involvement Network - LINK -) waa kormeere madaxbannaan oo kormeerta adeegyada caafimaadka iyo daryeelka bulsho ee dadka waawayn ee degmada Hackney laga fuliyo. Hackney LINK waxaa wakiil ka ah hay'ad gargaar oo degmada ka dhisan mgaceedana la yiraahdo - Social Action for Health - (Hawlgalka Bulsho ee Caafimaadka).

### **Waa maxay ujeeddada Hackney LINK?**

Hackney LINK waxay u dhisan tahay inay gudbisoo oo dhaqangeliso ra'yiga dadweynuhu soo jeediyaan ee la xiriira sidii kor loogu qaadi lahaa Adeegga Caafimaadka Qaranka (NHS) iyo kan daryeelka bulshada ee degmada.

### **Maxay Hackney LINK uga duwan tahay hay'dihii horay u jiray?**

Hackney LINK waxay leedahay awood qaanuuni ah oo ay jawaab uga hesho dadka adeegyada maamula, waxayna hubisaa inay u hoggaansameen wixii talooyin ah oo Hackney LINK ay u soo jeedisay. Hackney LINK waxay kaloo baaritaan ku samayn kartaa tayada iyo qalabka adeegyada degmada.

### **Yaa hay'adda ka mid noqon kara?**

Waxaa hay'adda ka mid noqon kara ururrada iskaa wax-u-qabso iyo dadka gaarka ahba. Dadka hay'adda ku soo biiraya waa inay deggan yihiin degmada ama ay isticmaalaan daryeeka caafimaad iyo kan bulsho ee degmada. Ururradu waa inay iyaguna degmada ka hawlgalaan.

### **Yaa maamula Hackney LINK?**

Hackney LINK waxaa maamula Hoggaan Kooxeed (Steering Group) go'aamiya habka ay Hackney LINK u shaqaynayso iyo waxyaabaha mudnaanta koowaad la siinayo. Hoggaan Kooxeedka waxaa iska dhex doorta xubnaha ay hay'addu ka kooban tahay.

### **Maxay Hackney LINK u baahan tahay inay iga ogaato?**

- Sidee wax kuugu muuqdaan haddii aad tahay bukaan-jiif isticmaala adeegga caafimaadka?
- Sidee wax kuugu muuqdaan haddii aad adeegga isticmaashid ama aad tahay daryeela ku hawlgala adeegyada daryeelka dadka waawayn?
- Maxay yihiin is beddellada aad is leedahay waa in la sameeyo?
- Ra'yi noocee ah ayaad hay'adda ku biirinaysaa si adeegyada kor loogu qaado?

Siyaabaha hoos ku qoran ayaad nagula soo xiriiri kartaa

Email: [info@hackneylink.org.uk](mailto:info@hackneylink.org.uk)

Website: [www.hackneylink.org.uk](http://www.hackneylink.org.uk)

Telephone: 020 8510 1972

Post: Hackney LINK  
Unit A (first floor)  
Ment House

1B Mentmore Terrace  
London  
E8 3DQ

**Foomka xubinnimada Hackney LINK (Hackney LINK Membership Form)**

Si aad xubin u noqotid fadlan sheeg macluumaadka soo socda: (To become a member please provide the following information☺)

Magaca (Name):

Cinwaanka (Address):

Telefoonka (Telephone):

Email:

Urur ama koox hawlgasha (Organisation or user group):

Ka dibna cinwaankaan ku soo celi (And return to this address):

**Hackney LINK**  
**Freepost RSBK-AZHL-AJBB**  
**62 Beechwood Road**  
**London E8 3DY**